

Guryo badan ayaa ku tiirsan ceelasha gaarka loo leeyahay.

Isticmaalayaasha ceelasha gaarka loo leeyahay ayaa mas'uul ka ah hubinta badqabka biyaha iyo in uu cabbi karo qof kasta oo guriga ku nool. Qiyaastii 1 ka mid ah 5tii guri ee Minnesota ku yaalla waxay ku tiirsan yihiin ceelasha gaarka loo leeyahay biyahana ay ka cabbgaan.



Waxda Caafimaadka Minnesota waxay kugula talinaysaa inaad biyaha ka baarto shan ka mid ah noocyada wasakhowga guud. Waa muhiim baaritaanka biyaha kolka aad guri cusub u guurayso.

Ilaali caafimaadkaaga!

Waxyaabahan ka baar ceelkaaga biyaha:



- ☒ **Bakteeriyada Coliform**
(Sannad kasta)
- ☒ **Nitrate**
(Sannad kasta)
- ☒ **Arsenic**
(Ugu yaraan hal mar)
- ☒ **Lead**
(Ugu yaraan hal mar)
- ☒ **Manganese**
(Ugu yaraan hal mar)

Aad ayay muhiim u tahay in biyaha la baaro haddii ay carruurta cabbayaan.

Hagaha Mulkiilaha Ceelasha
(<http://www.health.state.mn.us/wellguide>)

Su'aalo?

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan ceelasha gaarka loo leeyahay iyo macluumaadkooda waxaad ka helayaa qandaraaslaha ceelasha maxaliga ah ama wakiilada guryaha marka hantida lala kala wareegayo.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan tayada biyaha, baaristooda, daaweyntooda, ama dhisidda ceelasha, la xidhiidh Waaxda Caafimaadka Minnesota.

Minnesota Department of Health

625 Robert Street North
P.O. Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4600 or 800-383-9808
health.wells@state.mn.us
www.health.state.mn.us/wells



Khayraadka

Baarista Biyaha iyo Tayadooda

(www.health.state.mn.us/wellwater)

Raadi Shaybaarada la Aqoonsanyahay

(www.health.state.mn.us/labsearch)

Daaweynta Biyaha ee Guryaha

(www.health.state.mn.us/homewatertreatment)

Tusmada Ceelasha Minnesota

(www.health.state.mn.us/mwi)

Hagaha Qandaraaslaha Ceelasha ee Shatiga Haysta

(www.health.state.mn.us/lwcsearch)

Si aad xogtan ugu hesho qaab kale, wac: 651-201-4600.

Communication_Information(1.3)\Publications\BuyingandSelling
Waxaa la sameeyay: Sideedaad 2024



libsashada ama libinta Guri leh Ceel Gaara

Biyo nadiif ah, guri caafimaad leh.



Waxa la iska eego

Ceelka cusub wuxuu yeelan doonaa:

- Daboolka cimilada iska caabin kara
- 12 inji oo nadiif ah oo dhulka ka sarraysa
- Ceel leh summad Iyo lambar gaar ah oo lagu aqoonsado



Ceelasha iskuma wada eka. Ceelashii iyo koodadkii hore qaardood ayaa si kale u ekaan kara. Waxaana dhici karta in ceelasha aasmeen ama ay ka maqan yihiin waxyaabaha muhiimka ah sida ka muuqata sawirka kore. Haddii ay dhibaato kaa haysato inaad ceel ka hesho guriga, la xidhiidh qandaraasle ceel oo shati leh.

Haddii aad iibinaysid guri ceel leh

- ✓ Wakiilka guryaha ayaa kaa caawin doona waraaqaha loo baahan yahay inaad keento goobta lagu kala wareegayo hantida si aad u ogaatid xogta ceelkaaga.
- ✓ Qoraal muujinaya dhammaan xogta ceelasha, halka ay ku yaalliin, iyo in la isticmaalo ayaa lagaaga baahan yahay.
- ✓ Waraaqaha ay ku qoran yihiin xogta dhismaha iyo baaritaanada ceelkaaga ee aad horay u haysay, ururi oo ku wareeji mulkiilaha cusub.
- ✓ Dabool ceelasha aan la isticmaalin ee ku yaal guriga.

Haddii aad iibsanaayso guri ceel leh

Haddii ceelkaaga la dhisay ka hor 1974tii, waxaa laga yaabaa in diiwaanka dadwaynaha uusan ku qorneyn. Waxaase laga yaabaa inaad xogta ceelkaaga ka hesho Tasmada Ceelasha ee Minnesota. Wakiilka guryaha ayaa kaa caawin kara helitaanka xogta ceelka gurigaaga ku yaal.

Su'aalahan waydii iibiyaha:

- Goormaa ugu damabysay biyaha in la baaro? Maxaase laga baaray?
- Nidaam u dagan daaweynta biyaha miyaa hadda jira?
- Horay ma u jireen dhibaatooyin la xiriira tayada biyaha?
- Diiwaanka ceelka mala heli karaa?

Haddii aad biyaha ka hesho wasakh ka badan heerka badqabka, waxaa jiri kara siyaabo kharashka kuu beeqaaminaya wasakhdana ku yareyn karto ama ku saari karto. **Markaad guriga u soo guurto, baar biyaha aad cabbayso adiga oo adeegsanaya shaybaar la aqoonsanyahay.**




Shuruudaha Sharciga ah

Marka Minnesota la joogo, iibiyeyaasha ayaa mas'uul ka ah shaacinta ceel kasta oo la ogyahay in uu guriga ku yaal iyo haddii la isticmaalo.

Lama ogola in biyaha la baaro xilliga wareejinta hantida, haddaba degmooyinka Minnesota qaarkood ayaa ogol arrintaas. Eeg xeerarka degmada haddii gurigaaga ku yaallo aagga laga ogolyahay.

Nidaamka Nadiifinta Biyaha Wasakhda ah

Si nidaamka nadiifinta ee gurigaaga uu si fiican ugu shaqeeyo, waxaa loo baahan yahay in si joogta ah loo hagaajiyo. Haddii uu jiro ceel gaar ah oo gurigaaga ku yaal, waxay u badantahay in uu leeyahay nidaamka nadiifinta biyaha wasakhda ah.



Shuruudaha waxaa ka mid ah in warbixinta kormeerka ay ka muuqato nidaamka nadiifinta biyaha wasakhda ah kolka hantida la wareejinayo. **Isku mid maahan dhammaan nidaamyada nadiifinta biyaha wasakhda ah oo guryuhu way kala duwan yihiin.**

Ku Saabsan Dhammaan
Nimaadyada Nadiifinta Biyaha Wasakhda ah
(<https://septic.umn.edu/all-about-septics>)

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan nidaamkaaga nadiifinta biyaha wasakhda ama warbixinta kormeerka, la xiriir xafiiska degmadaada ee ku shaqada leh qorsheynta iyo aagayta. Habka nadiifinta biyaha wasakhda ah waxaaa laga maamulaa gobolka iyo degmada.



Talo: Weydiiso kormeerahaaga inuu baaro ceel kasta oo guriga ku yaal hana ka eego waxyaabaha muuqda sida dildilaaca, ama la xiriir qandaraasle shati ceel haysta. Isku mid maahan qaabka loo kormeero ceelasha iyo guryaha.